Paid Leave Oregon

# Tilmaamaha Foomka Wakiilka Idman ee Marxuumka

## QAYBTA 1-AAD: TILMAAMO GUUD

Buuxi oo gacantaada ku saxiix foomkan haddii **aad codsanayso in laguu aqoonsado wakiilka idman ee marxuumka si aad u matasho dacwadiisa la xiriirta magdhowga.**

Si aad u noqotid wakiil idman, waa inaad ahataa mid ka mid ah shakhsiyaadka soo socda:

- Xaaska/Ninka nool ee marxuumka
- Qof haayo ammaanada qofka kale marka uu nool yahay (ammaano ka hor geerida)
- Cunugga,waalidka, walaalka mise walaasha, wiilka mise gabadha adeer mise abti u yahay qofka dhintay (marxuumka)

Paid Leave Oregon ayaa kala niqaashi kartaa dheefaha barnaamijka Paid Leave ee hadda la heli karo iyo kuwa aan weli wakhtigooda la gaarin. Idinka wuxuu noo fasaxayaa inaan wadaagno macluumaadka caadiyan cid kale lala wadaagin ee ku jira galalka diiwaannadeena. Waxaa ka mid ah, balse kuwan kali kuma koobna:

- Macluumaad ku saabsan dheefooyinka uu helay mise uu helaayo dheef-sugaha
- Macluumaadka lagu bixiyey arjiga koowaad ee dheef-sugaha
- Macluumaad ku saabsan goa'aan aan baasmarinay mise wali aan ku hawl-jirno ee ku aadan codsi la soo gudbiyey

Waxay sidoo kale siinaysaa wakiilka idman oggolaansho uu macluumaad ugu gudbiyo Paid Leave, sida macluumaad loo baahanyahaysi loo:

- Buuxiyo arjiga/cosashada dheefaha/gunnooyinka/cayrta
- Xareeyo codsi cusub ee ku aadan dheefaha dheef-sugaha
- Qabanqaabiyo bixinta lacagaha dheef-sugaha ee la ansixiyey isagoo matalaya
- Codsado garmaqal ka dhan ah si dib loogu eego Go'aan ay gaartay Paid Leave isla markaana isu soo hortaag loogu sameeyo dhageysiga Xafiiska Garmaqalka arimaha la xiriira Maamulka adigoo qareen u ah dheef-sugaha

Paid Leave waxay hal wakiil idman u aqoonsanaysaa inuu matalo codsigiiba. Ma aqbali doonno codsi ka dhan ah inuu qof noqdo wakiilka idman ee marxuumka haddii mareeyaha iyo isku-duwaha hantida marxuumka mise qofka haya ammaana hantida marxuumka mise qof ay maxkammada u idintay inuu mareeyo hantida marxuumka loo oggolaado inuu matalo magdhow/dheef-sugaha arrimaha la xiriira Paid Leave Oregon.

**Fiiro gaar ah:** Paid Leave waa inay siisaa gunnooyinka dadka la dhashay/ehellada marxuumka iyadoo raacaysa nidaamka mudnaan-siinta ee ku xusan xeerka ORS 293.490(3).

**Fadlan bixi dhammaan macluumaadka loo baahanyay. Macluumadka oo aan dhammeystirnayni wuxuu sababi inuu dib u dhigo go'aan ka soo saarista codsigaaga. Saxiixyada foomkan waa inay noqdaan kuwo lagu saxiixay gacanta. Ma aqbali doonno saxiixyada elektarooniga ah.**

**Haddii aad diyaar u tahay inaad codsi la xiriir dheefta aad soo gudbiso adigoo matalaya dheef-sugaha, waxaad ku soo diri kartaa codsigaaga foomkan.**

**Fiiro gaar ah: Adigoo ah wakiilka idman, ayaa ah qof kaliya soo diri kara arji dheef oo ka dhan ah qofka aad ku matalayso codsiga.**

**Ma u baahan tahay caawimaad?**

Macluumaadkani waa mid aad u muhiim ah. Waaxda Shaqaalaynta ee Oregon (The Oregon Employment Department, OED) waa wakaalad leh fursad loo siman yahay. OED waxay ku siineysaa caawimo bilaash ah si aad u isticmaasho adeegyadeena. Tusaalooyinka qaarkood waa luqadda dhegoolaha iyo tarjumaannada luuqada lagu hadlo, agab ku qoran afaf kale, far waaweyn, maqal iyo qaabab kale. Si aad u hesho caawimo, fadlan wac 833-854-0166 (lambarka bilaashka ah). Dadka isticmaala TTY waxay wacaan 711. Waxaad sidoo kale iimaayl u diri kartaa access.paidleave@oregon.gov.

## QAYBTA 2-AAD: TILAAMAHA KU SAABSAN SIDA LOO BUUXIYO FOOMKA

**Qofka Codsanayo inuu noqdo Wakiilka Idman:** Buuxi Qaybaha A, B iyo C ee foomkan.

- **Qaybta A:** Qaybta ku qor/buuxi macluumaadka sheegashada  marxuumka iyo taariikhda uu dhintay.
- **Qaybta B:** Ku buuxi qaybtan macluumaadkaaga.
- **Qaybta C:** Buuxi, gacantada ku **saxiix isla** markaan ku qoor taariikhda qaybtan Ma aqbali doonno saxiixyada elektarooniga ah.
    - Idinka wuxuu si toos ah u dhammaadaa marka sanadka dheefaha ee codsadihii dhintay uu dhamaado, ama haddii aadan gudbin codsi ku aadan dheefaha Paid Leave 30 maalmood gudahood tan iyo markii laguu oggolaaday inaad noqoto wakiilka idman..
- Ku lifaaq dukumentiyo caddeynaya waxaad isu tihiin  marxuumka  iyo dukumentiyo muujinaya aqoonsiga marxuumka iyo aqoonsigaaga. Waxaad ka heli kartaa Qaybta 3-aad ee tilmaaha liisti shegeysa dukumentiyada la aqbali karo ee kaabi kara codsiga.
- Ku lifaaq waraaqda/shahaada dhimashada mise dukumentiyo kale oo ay ansixisay waaxda oo muujinaya taariikhda dhimashada.
- Waa inaad u dirtaa foomkan iyo dukumentiyada kale ee loo baahanyahay Paid Leave. Waxaad ku soo diri kartaa qaab elektaroonig ah adigoo adeegsanaya foomka Nala soo xiriir ee ku yalla barta frances.oregon.gov, mise qaab boosto ah adigoo adeegsanaya ciwaankan:

**Attn: Paid Leave Oregon**
**Oregon Employment Department**
**875 Union St NE**
**Salem, OR 97311**

## QAYBTA 3-AAD: DUKUMENTIYADA LA AQBALI KARO

**Dukumentiyada la aqbali karo si loogu xaqiijiyo waxaad isu tihiin/xiriirka kala dhaxeeyo marxuumka:**

- Waraaqda/Shahaadada Dhalashada
- Waraaqda/Shahaadada Guurka
- Dukumentiyo kale, haddii Paid Leave Oregon ay go'aansato inay aqbasho, oo ka soo baxday dhinac saddexaad oo madax-bannaan, kuwaas oo caddeynaya guurka, waalidnimada, ama xiriirka qoyska ee u dhexeeya dheef-sugaha iyo qofka codsanaya inuu noqdo wakiilka idman isagoo matalaya dheef-sugaha.
- Dukumentida ammaanad ee caddeynaya inaad tahay qof ammaano loo dhiibtay.

**Dukumentiyada la aqbali karo ee caddeynaya aqoonsiga marxuumka iyo qofka codsanaya inuu matalo codsadihii dhintay:**

**Fiiro gaar ah:** Waa inaad soo dirtaa labo dukumenti aqoonsi oo aasaasi ah mise mid aasaasi ah iyo labo dukumenti oo kaabaysa codsiga oo adiga iyo cid aad matalayso iska leh. Waa inay ahadaan kuwo dhijitaal ah oo muujinaya midibkooda asalka ah isla markaana ah qaab PDFs ah.

**Dukumentiyada aasaasiga ah**

- Leesinka/Shatiga darawalnimada (ama ruqsada ardaynimo) ee ay bixisay gobol ama dhul hoos yimaada Maraykanka (Waxaan aqbaleynaa shati/leesin dhacay haddii uu dhacay 12-kii bilood ee la soo dhaafay isla markaana uu is haysto.)
- Dukumentiyada kale ee aqoonsi ee ay bixisay dowladda (Waa inaay ahadaan kuwo dal-ku joog rasmi ah oo leh sawirka qofka. Aqoonsiyada Militiriga , dukumentiyada mise waraaqaha sida ku meel gaarka ah dal loogu joogo lama aqbalaayo.)
- Aqoonsi sawir leh oo ay soo saartay dowlad goboleed (Waxaan aqbaleynaa aqoonsi dhacay haddii uu dhacay 12-kii bilood ee la soo dhaafay isla markaana uu is is-haysto.)
- Baasaborka Maraykanka mise Kaarka Baasaboorka Maraykanka
- Maraykanka Kaarka Dal ku joogga ee Rasmiga ah (I-551
- Kaarka Aqoonsiga Shaqaalaha ee ay bixisay USCIS (I-766) (Ma ahan kaararka aqoonsiga shaqa bixiyaha soo saaro)
- Baasaboorka ajaaniibta
- Kaarka Aqoonsiga Caafimaadka Qof horaan uga tirsanaa ciidanka qalabka sida
- Kaararka Safarayda ay Xaqiijisay Waaxda DHS (DHS Trusted Traveler Cards (Global Entry, NEXUS, SENTRI)
- Leesinka/Shatiga daraawalnimada ee ay bixisay Kanada
- Waraaqda Muwaadnimada (Form N-550 mise N-570)
- Kaarka Aqoonsiga ee Dalka (kaliya haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan Maraykanka.)
- Aqoonsisawir leh oo ay soo saartay Qolo ay dawladda federaalka aqoonsantahay
- Fiisaha dal ku jooga ee la siiyo ajaaniibta ee ay bixiso Maraykanka Dukumentiyada ay bixiso Waaxda Arrimaha Dibadda (oo aysan dhacsanayn in ka badan shan sano)
- Fiisaha dal ku jooga ee la siiyo ajaaniibta (I551) ee ay bixiso Maraykanka Dukumentiyada ay bixiso Waaxda Arrimaha Dibadda (oo aysann dhacsanayn in ka badan shan sano)

**Dukumentiyada aan Aasaasiga ahayn**(Dukumentiyada hoos ku xusan/soo socda oo ah dhijitaal, leh midibkooda asalka ah isla markana ah qaab PDFs ayaa la aqbali karaa inay noqdaan dukumentiyo aan aasaasi ahayn )

- Kaarka Sooshal Sekuuritiga
- Maraykanka Shahaadada Dhalashada ee Dibadda (FS-545)
- Maraykanka Shahaadada Warbixinta Dhalashada (FS-1350)
- Maraykanka Waraaqda Dhalasha Cunug ku soo dhashay Dibadda (FS-240)
- Kaarka caymiska caafimaadka ee dalka Maraykanka
- Waraaqda dhalashada maraykanka oo leh shaabbad rasmi ah (magaca koowaad iyo magaca dambe)
- W-2 form
- 1098 form
- Kaarka caymiska otomaatiga ah
- Kaarka qaabilaadda xuduudaha
- Maraykanka Kaarka Ilaalada Gaadiidka kula goosha Badda
- Maraykanka Kaarka Aqoonsiga Muwaadinnimada form (I-197)
- Canadian Indian and Northern affairs card
- Kaarka aqoonsiga ardeyga ee Kolejka mise jaamacadda
- Shahaadada kolejka mise jaamacadda
- Shahaada/Waraaqda ka fadhisashada Militiriga Dawlada (DOD)
- Dukumentiga caymiska guriga mise gaariga
- Warqad cadeynaysa deganaanshaha gobolka
- Shahaadada helaha Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah
- Dukumentiga Muujinaysa Qof Maraykan Dhalad ah
- Non SSA-1099 form
- SSA-1099 form
- Shahaadada mise kaarka diiwaangelinta Codbixiye ku dhaqan Maraykanka mise gobol aymaamusho
- Shahaadada helaha Barnaamijka Haweenka, Dhallaanka, iyo Caruurta (WIC) ee Puerto Rico

**Dukumentiyada aan asaasiga ahayn ( Waa in la bixiyey muddo ka yar 90** maalmood)

- **Biilka adeegyada guriga** (oo muujinaya lambarka koontadaada, magacaaga oo seddaxan, iyo meesha aad hadda ku nooshahay/ adereeskaaga/ciiwaankaaga)
- **Biilka adeegyada caafimaadka** (oo muujinaya lambarka koontadaada, magacaaga oo seddaxan, iyo meesha aad hadda ku nooshahay/ adereeskaaga/ciiwaankaaga)
- **Bayaanka bangiga, amaahda, mise** hay'adda maaliyadda (oo muujinaya lambarka koontadaada, magacaaga oo seddaxan, iyo ciwaanka aad hadda ku nooshahay; oo ay bixisay bangiga)
- **Risiidka munshahaarka** (oo muujinaya magaacaga oo dhammaystiran, magaca shaqa-bixiyahaaga mise shirkaddaada, ciwaanka aad hadda ku nooshahay; waa inuu ahadaa risiid lacag bixineed loo lama jeedo jeegga bangiga)

# Foomka Wakiil Idman Marxuumka Dheef-sugaha ah

| QAYBTA A - MACLUUMAADKA MARXUUMKA/DHEEF-SUGAHA | |
|---|---|
| Magaca Hore: | Magaca Dambe: |
| Lambarka Sooshal Sekuuritiga (SSN): ______________________ ama<br><br>Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha Shakhsiga ah (ITIN): ____________________ | |
| Taariikhda dhalashada (BB/MM/SSSS): / / | Taariikhda dhimashada (BB/MM/SSSS): / / |
| Ciwaanka guriga: | Ciwaanka boostada (Haddii ay ka duwan tahay tan guriga): |
| Ciwaanka iimaylka (ikhtiyaari): | Lambarka taleefoonka (ikhtiyaari): |

| QAYBTA B – MACLUUMAADKA WAKIILKA LA IGMADAY | |
|---|---|
| Magaca Hore: | Magaca Dambe: |
| Taariikhda dhalashada (BB/MM/SSSS): / / | Xiriirka kala dhexeeyo marxuumka/dheef-sugaha: |
| Ciwaanka guriga: | Ciwaanka boostada (Haddii ay ka duwan tahay tan guriga): |
| Lambarka taleefanka: | Ciwaanka iimaylka (ikhtiyaari): |

**QAYBTA C:OGGOLAANSHAHA IYO SAXIIXA WAKIILKA IDMAN**

**Qiraalka wakiilka idman:** Waxaan ah ninka/xaaska, qof haya ammaana, cunugga, waalidka, walaalka mise walaasha, gabadha mise wiilka adeerka mise abtiga u yahay qofka dhintay/marxuumka. Waxaan u matalayaa marxuumka si ku dheehan danta guud ee hantadiisa, waxaanan ilaalin doonaa asturnaanta dhammaan macluumaadka aan ka helo Paid Leave Oregon ee ku saabsan dheef-sugaha.

Saxiixa sWakiilka Idman: Taariikhda: / /

**Sida wakiilnimada lagu idmay ee ku aadan marxuumka lagaga qaadi karo/ ku dhamman karto:**

- **Idinkaaga si toos ah ayuu u dhammaani marka uu sannadka dheefta ee dheef-sugaha uu dhammaado.**
- **Haddii aadan u gudbin codsi ku aadan dheefaha Paid Leave marxuumka 30 maalmood gudahood tan iyo markii laguu oggolaaday inaad noqoto wakiilka idman, idinkaaga ayaa si toos ah u dhammaan doona.**

**Waa inaad gacantaada ku saxiixdaa foomkan. Ma aqbali doonno saxiixyada elektarooniga ah.**